Cutubka

# 7aad




# LACAGTA

## 7.1 Iskubedelidda Halbeegyada lacagta (Sarrifaada lacagta)

Xisaabta fasalka labaad waxaad xasuusan tahay in aad ku soo baratay saantiimyada (duruurida ama qadaadiicda) Itoobiya. Kuwaas oo ah. Kuwaan hoos lagu muujiyay



| 1 Saanti | 5 Saanti | 10 Saanti | 25 Saanti | 50 Saanti | 100 Saanti /1 Birr |
|---|---|---|---|---|---|

Lacagta Itoobiya ee noodhyada ahna waa kuwan hoos lagu muujiyay



| 5 Birr | 10 Birr | 50 Birr | 100 Birr |
|---|---|---|---|

**Hawlgal 7.1**

1 Idinka oo koox koox isku qaybinaya iswarsada oo falanqeeya halbeegyada lacagta Itoobiya, kadibna cadeeya sida ay isugu dhigmaan.

**2** Halbeega lacagta ee noodka ah ku bedala (ku sarrifa) halbeegyo yar-yar oo lacagta noodhyada ah.

**b**



1 noodh oo boqol birr ah
= ________ noodhyo oo konton birr ah.

**t**



1 noodh oo konton birr ah
= _______ noodhyo oo toban birr ah

**j**



1 noodh oo shan birr ah
= ________ noodhyo oo hal birr ah.

**x**



1 noodh oo konton birr ah
= ________ noodhyo toban birr ah
= ________ noodhyo oo shan birr ah iyo
= ________ noodhyo hal birr ah.

97 saantiyo ku bedala halbeegyo beesado (qaadaadiic) ah oo ka kooban beesada. Kontonka saanti tobanka saanti, beesada shanta saanti, iyo beesada halka saanti.



Sidaas darteed 97 saanti
= 1 beesad oo konton saanti ah 4 beesadood oo tobano saanti ah 1 beesad oo shan saanti iyo 2 beesadood oo hal saanti ah



Idinka oo isticmaalaya beesadaha 25 saanti 10 saant; 5 saanti iyo 1 saanti sheega sida kale ee 97 saanti loo bedali (loo sarrifi).

## Laylis 1

**1**

**b**





____ Birr

**t**





____ Birr

**j**





____ Birr

**2** **b** 1 noodh oo konton birr ah waxa lagu sarifi karaa ____ noodhyo oo shan Birr ah.

**t** 3 noodhyo oo boqol birr ah waxaa lagu sarrifi karaa ____ noodhyo oo konton Birr ah.

**3**

**b**





____ saanti

**t**





____ saanti

**j**





____ saanti

**x**





____ saanti

**kh**





____ saanti

**d**





____ saanti

**4** ***Waydiimahan hoose ka jawaab***

**b** 3 birr imisa beesadood oo midwaliba ay 25 saantiim tahay ayay noqon?

**t** 10 birr imisa beesadood oo midwalba ay 50 saantiim tahay ayaa lagu sarifi?

**j** 5 birr imisa beesadood oo midwalba ay 10 saantiim tahay ayaa lagu sarifi?

**x** 2 birr imisa beesadood oo midwalba ay 5 saantiim tahay ayay noqon.

**kh** 2 birr iyo konton saantiim imisa besadood oo midwaliba ay 25 saantiim tahay ay noqon.

**5** ***Raadi laba wado oo lagu sarifi karo lacagta hoos ku tilmaaman***

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| **b** | 3 birr | **t** | 55 saantiim | **j** | 74 birr |
| **x** | 68 saantiim | **kh** | 26 saantiim | **d** | 1 birr iyo 25 saantiim |

## 7.2 Weedh-xasaabedyolaxidhiidhalacagteena

### Hawlgalka 7.2



Laabis

30 saanti



qalin qori

1 birr



buug

2 birr iyo 50 saan



qalin

1 birr iyo 80 saanti



Qashiirad (qalin qorto)

65 saanti

1 Waxyaalaha hoos lagu muujiyay in aad iibsatid inta lacag ee aad u bahnaan xisaabi.



2 Haddii aad iibsatid 1 buug, 1 qalin qori iyo 1 qalin imisa birr iyo imisa saantiim ayaad bixin?

3 Axmed wuxuu iibsaday 1 Laabis, 1 qalin qorto (qashaarad) iyo qalin qori lacagta uu ku bixiyay waa imisa?

4 5 birr haddii aad haysatid inta qalabka loo adeegsado qorista ee aad mar ku iibsan karaysid qor.

5 Cabdi wuxuu iibsaday 1 qalin qori iyo 1 Laabis, Haddii uu 2 birr bixiyo imisa ayaa loo soo celin?

6 Xaliimo waxay iibsatay 1 laabis iyo 1 buug. Hadaba haddii ay 3 birr bixiso imisa saantii ayaa loo soo celin?

7 Yusuf wuxuu haystaa 3 lacagta saantiyada ah oo konton, konton saantiimyo ah, 5 toban toban saantiimyo ah iyo 5 shan shan saantiimyo ah. Hal buug in iibsado imisa saantiim ayuu u baahan yahay.

## Laylis 2

1 Qof khudaarta ka ganacsada ayaa khudaarta uu iibiyo waqti go'an sicirkooda sidan hoos ku tusan shaxan ku qaray oo dukaankiisa ku dhaJiyay.

| Nooca khudradda | Qiimaha 1kg |
|---|---|
|  | 5 Birr |
|  | 4 Birr |
|  | 6 Birr |
|  | 1 Birr iyo 25 saant |

- **b** 2 kg oo tamaandha qiimihiisu waa imisa?
- **t** Haddii aad iibsatid 1 kg oo baradho ah iyo 1kg oo basal ah. Imisa ayaad bixin?
- **j** qiimaha 1 kg oo tamaandha ah 1 kg oo baradho ah iyo 1 kg oo Qaji (basbaasta cagaaran) waa imisa?
- **x** Caasha waxay iibsatay 1kg oo basal ah iyo 1kg oo qaji ah Haddii ay bixiso 8 birr imisa ayaa loo soo celin?
- **Kh** Nus kiilo baradho ah haddii aad iibsatid imisa ayaad bixin?

2 Khadar wuxuu haystaa 1 birr. Haddi uu 78 saanti ku iibsado salool imisa ayaa u hadhi?

3 Siciid wuxuu haystaa 3 lacagta qadaadiicda ah oo midkii waliba yahay labaatan iyo shan saantiim. 60 saantiim haddii uu kabihiisa ku baalishaysto imisa ayaa u soo hadhi?

4 Xaawa Aabaheed wuxuu siiyay 100 birr si ay dhar ugu iibsato. Haddii ay 48 birr ku iibsato diric 25 birr na malkhabad, imisa ayaa u soo hadhay?